Xarakaadka Nolosha

Xaasid Looma Waayo





W/Qoray:Feysal Maxamed Cabdiraxmaan

XERAKAGA NOLOSHA XAASID LOOM WAAYO

Qof walbo oo dunida ku nool waxa uu jacelyahay in uu ku noolaado nolol mida ugu sareyso balse waxaa jir dad kale oo kuu ogoleyn noloshaas farxada leeh oo aad heysati.

Farxada binu adamka waxa ay isku jirtaa wax yaalo kala duwan haba ugu horeysee qofka in uu helo xornimo uu ku doran karo qofka uu rabo in uu nolasha la wadaago iyo cid walbo oo u arko in ay hormarinaayo noloshoodo,balse cadowga nolosha wey fara badan yihiin haba ugu horeyo cadowga JACEYLKA.

Falis waxa ay aheyd gabar ku nooleed xeryaha qaxootiga ay xagar dheer waxa ayna la nooleed qoyskeeda oo ka goban 2 wiil , gabar iyada ka weyn ,Hooyadeed iyo Aabbeheed waxa ayna wax ka baran jirtay mid ka mid ah macihida ku

yaalo xerada oo ay ka baran jirtay Luuqada iyo xisaabaadka.

Filsan waxa ay aheyd gabar fur furan oo mar walbo jecleyd in la kaftanto wiilasha iyo gabadha ay isku fasalka yihiin haba ugu badnaadee xaga wiilasha.

Halmar ayaa waxaa is badalay farxadii qoyska Filsan ka dib markii ay hooyadeed umul raacatay oo ay geeriyootay, intaas ka dib Aabbeheed waxa uu go'ansaday in uu u wareejiyo rerkiisa kale oo ku noolaa gobolka Jubada Hoose gaar ahaa magaalada Kismaayo oo rerkiisa kale dagnaayeen.

Balse Filsan iyo walaalaheyd waxa ay bilaabeyn in ay ka soo horjeystaan go'anka Aabbeheed waayo xirir fican kama dhaxeyn iyaga iyo rerka kale ay Aabbeheed .

Mudo markii ay ka caga jiidaayeen ayaa Aabbahood ku qanciyay in ay kala dagaayaan

laba guri oo isku dhaw balse uu rabo in ay si wada jir ah ugu nooladaan magaaladaas isaga oo ka foogaynaayo halkii uu ku waayay xaaskiisa.

Filsan ayaa darentay jogista inta in ay Aabbeheed ku tahay xanuun sidaas darteed waxa ay walaalaheed u shegtay in ay aqbalaan ayna racaan go'anka Aabbeheed, ugu dambeyntii waxa ay u soo guuren magaalada Kismaayo.

Imashaha Kismaayo maxey ka badasay nolasha Filsan?

Filsan markee soo aadeysay Kismaayo maxey aaminsaneed?

Ka dib markii ay soo dageen magaalada Kismaayo oo ay mudo nasteen Filsan waxa ay bilowday in raadsato meel lagu barto luuqada iyo caafimaad iyada oo hamigeda ahaa in ay noqoto umuliso dhaliso dumarka balse ugu

dambeyntii waxa ay heshay xarun lagu barto umulisanimada iyo luuqada weyna iska soo diiwaan galisay waxana loo shegay in ay daraasada bilaaban doonto isbuuca soo socdo.

Filsan waxa ay bilowday in ay hori u sii wadato wadadii ay ku gaari laheyd hamigeeda.

Ku biirita iskuulka maxaa dhacay ka dib?

Filsan waxa ay aheeyd gabar bashaasha ah waliba leh qurux iska macquul ah midabkeeduna uu yahay maarin kaas oo ah midab midka ugu wacan ugu quruxda badan qarniga 21aad markii ay ku soo birtay iskuulka durbo waxaa feel iyo hardan u galay dhalintii iskuula mid walbane waxa uu ku riyoonayay in uu mar un gacanta ku dhigo gabadhaan Eebbe ku manestay quruxda iyo kaftanka.

Mudo markii ay dhalinta dusha ka dawanayeen quruxdeeda oo mid walbo raadinaayao fursad uu kula hadlo meel gaar ah waayo inta badan

waxaa la socdo gabdho kale haba ugu badnaato gabar ay saxiib ka dhigatay oo ay isku wado ahaayeen xafadooda.

Intaas ka dib ayaa waxaa dhalintii ka soo baxay geesi kaas oo la imaday qorsho caajiib ah oo kula hadlo iyada.

Toloo muxuu sameyay geysiigii u bareeray hanashada Filsan?

Wiilkii ayaa intuu soo baxay waxa uu sameyay iyada oo bananka lagu maqanyahay inta uu dul imaday meshii buugata u taalay ayuu mid ka mid buugaagteda ugu qoray erayao soo jiidasho leh oo ku cabiraayo darenkiisa iyo sida uu u daneenayo in ay mar un wada hadlaan.

Walee ka ma dawoowo cashaqa dareen iyo howl iga madaayee.

Mar kastoo ladnaadaba dhib wuxuu ka kenaa daqar iyo xumaatee .

Wuu idaadaheeyaa gor ii laba digleeyaa

iimana dulqaadeetee Filan iga dawee.

Waxa uuna intaas u sii raciyay numberkiisa waxa uuna ka codsaday hadii aad aragti fadlan waxaan ahay qof u ooman maqalkaaga ay si dag dag ah igula soo xiriir MACANEY.

Mudo ka dib Filsan ayaa fasalkii dib ugu soo labatay waxa ayna dib u sii wadatay daruusteeda, wiilkiina waxa uu iloobay darusta fasalka ka socoto waayo waxa uu ku mashquulay in uu argo in farintiisa in la argay iyo in kale balse ugu danbeyntii maba aysan arkin.

Intaas ka dib wiilkii waxa uu isdhahay tan waa kugu guuldareysatay ay wado kale raadi iska oo sidaas ku fikirayo ayuu gurikiisa ku labtay.

Balse wax walbo waxa ay isbadaleen markii ay Filsan ku labatay guriga.

Filsan sida cadada fiid walbo waxa ay aqrin jirtay darusta, markii ay dhameysatay aqrista

daruusteeda ayee si la yaab leh waxa ay ku aragtay qoraal ku qoran bogga ay dhameysay mida ku xigo waxa ayna billaabday in ay fiiriso qoralka waxa uu yahay balse waxa ay aragtay waxa ay fileysay wax ka duwan oo ka yaabiyay.

Filsan markiiba waxa ay bilowday in la xiiriirto iyada oo u fineyso balanta la soo raciyay warqada nasiib daro talefanka waxa uu ahaa mid dansan.

Saacad ka dib ayee Filsan ku celisay numberkii nasiib wanaag waa u dhacay waana la ga qabtay waxana dhaxertay sheekadaan

Filsn "Hello walaal"

Wiilkii " Haa walal ma Filsan baa"

Filsan " Haa waa Filsan , sidee tahay walal"

Wiilkii " Wan fiicanahay walal, adi sidee tahay"

Filsan " Waan ficanahay , magacaa wll"

Wiilkii " Magaceyga waa Axmed"

Filsan “ Fasalka maa ila dhigataa wala halkeesa dagan tahay”

Wilkii “ Waxaa kula dhigtaa fasalka waxana daganahay xafadaa agteeda “

Filsan “ wan argay farintaada ilaa gormaa I raadineysay maxaasaa xili hore igu soo gudbin weysay?”

Axmed “ Waxaan ku cashaqay malintaa fasalka kugu argay oo aad su’alaha ka jabaabeysay ilaa manata, wan jeclaa inaa xili hore kula soo xiriiro balse mar walbo waxaa aheyd mid mashquulsan oo asxaabtada dhaxda ugu jirtay, balse hada ayaa is helnay ay maxaa ka qabtaa hadaa saxiib noqono sidee kula tahay taas?”

Filsan “ Ma xumo balse waxaa u baahanahay fursad aan in badan kaga soo fikiro ilaa bari iga war sug ‘

Axmed “ Wan ku sugayaa waxana rajeynaa in aad xageyga u soo jaleceysi “

Filsan " Wan arki doonaaa In sha Allah".

Habenkii oo dhan Filsan waxa ay aheyd mid ka fikireysay arinta Axmed balse ugu dambeyntii waxa ay go'aan ku gartay in ay aqbasho Axmed iyada oo ku kalsooneed in aysan ku qasaari doonin.

Habeynkii xige ayuu Axmed la soo xiriiray Filsan waxa ayna iska wareysteen xaladaha intaas ka dib Axmed waxa uu bilaabay in uu kala hadlo arintiisa waxa uuna ku bilabay .

Axmed " Waxaa filaa waxa ii heysaa arin ifarax galin doonto ama iniya jabin doonto "

Filsan " Maxaa iga filee adi "

Axmed " Ani waxa ku kalsoonahay dareenka jaceylka ah oo I haayo kaas oo ii sheegayo in aan iga aqbali doonto"

Filsan " Ma xumo kawaran hadaa ku dhaho waxaas diyaar uma ihi maxaa sameynee?"

Axmed “ Kaliya waa kaga mahadcelinaa maanta meeshaa ii dagantahay ayaa ii taagnaanee sidaa kuu hada kuu ixtiraamayo sidaas ayaa kuu sii ixtiraamaa oo kaliya “

Filsan “ Waa ka gudubtay imtaxanka aa ugu soo biiraysay nolasheeda hadana waa ku aqbalay “

Intaas ka dib waxa ay sii go’ansadeen in ay koriyaan jaceylkooda curdunka ah oo u bahaan goriimo iyo xanaaneen badan .

Axmed iyo Filsan waxa ay ahaayeen kuwo mar walbo isoo xiriiriyo oo iska waheshada dadka kale waqtiyadoodana way isla qadanaayen inta badan iyaga oo is dhaafsanaayo erayo u roon laabta midba midka kale kula hadlaayo iyo geeraaro cajiib ah.

Fisan waxa ay aheyd mid inta badan waqtikeeda la qaadato gacaliyaheed iyada oo gartay heer ay seexan weyso codkiisa la’antiis.

Mudo isbuuc ah markii ay qadka ku wada xiriiraayeen ayee waxa u ka codsatay in wada kulmaan iyada oo dirtay farintaan;

Jeclaashaha erayadaada ku jeel baxaa aragtidaada

ku jiifsida xiisahaaga waxa ku jaalaa nafteeda.

Adkee wada joogisteena

Jogtee wada socoshaheena

Inaga is jeclaashaheena ka dhig jadwalkaaga gaarka ah

Janaa u argaa agtaada jalbaa u qabaa codkaaga

Hor jogaagaa ku bartaa jaceylka .

Axmed durba wuu soo dhaweyay kulankaas.

Kulankoodii ugu horeyay waxa ay ku kulmeeyn meel ay maqayad ah oo u dhaweyd iskuulkooda xili galab ah.

Halkii ayee ku wada qaateen waqti qurux badan wax badana ku ugu wada hadleen iyda oo midba

midka kale u balan qaaday in aysan is cidleeyn waliba nolosha wadaagaan sida ugu macquulsan.

Axmed waxa uu ahaa mid hamigiisa ahaa in uu guursado maadamo uu awoodo nolasheeda una leyahay meel lagu daabaco laguna ii biyo agabka wax lagu barto.

Balse Filsan ayaa ka diiday oo tiri markaa iskuulka dhameyno ayaa isguursaneena.

Markii Axmed iyo Filsan jaceylkooda gaaray meel sare ardayda asxabtodana ogaadeyn kaliya ay sugaayeen xilika guurka.

Malin malmaha ka mid ah ayaa Filsan iyo gabar ay saaxiibo yihiin oo ay xaafada daris ku yahiin oo xili fiid ah wada fadhiyaan ayaa sidee u kaftamaayeen ayaa Filsan waxaa u soo dhacday fariin uu soo diray gacaliyaheda Axmed ka dibna farinta ayee ku faraxday, intaas

ka dib gabadhii ayaa ku tiri farxadaada ayaa baxeyso ay sidee wax yihiin maa ii sheegti.

Filsan iyda oo dhala cadeyneysa ayee ku tiri wax sidaas ah ma jiraan ay kaliya gacaliyaheeda ayaa fariin ii soo diray.

Gabadhii ayaa ku tiri " Adaaba war ii haayo gacaliye aa , oo hada ma nin baa amintay oo xiriir la sameysay mana ku kalsoontahay iska hada"

Oraah horaa aheyd guri gubtay guri dhisan kama naxo oo waxa uu jacel yahay in lawada dumo dhamaan.

Filsan " haa waan ku kalsoonahay waayo waa wiil fiican waxna wuu bartaa waana shaqeystaa "

Gabadhii " Ma xumo hada ma qiyasi kartaa xalada oo ku sugan yahy in oo naag kale la joogo ama la haasaawaayo "

Filsan “ Waan ku kalsoo nahay waayo hada ayuu fariin ii soo diray “

Gabadhii “ Gartay hada ma I tusi gartaa sawirkiisa si aan kula argo maadaama aan kaa weynahay”

Filsan “ Haa waa kanaa fiiri”

Gabadhii “ Waa iska dhax dhaxaad balse waxaa u maleynaa in aan meel ku argay’

Filsan “ Haa waayo waxa uu dagan yahay xafada naga shisheeso amaa melahaas ku aragtay”

Gabadhii “ Haa waliba iska oo maalin la dagan gabar kale

Filsan “ Gabar aa gormee aheyd ?”

Gabadhii “ Labo habeyn ka hor “

Filsan “ Gartay

Intaas ka dib filsan waxaa ku beer may shaki iyo wal wal

Balse qof meel u cadahay qofna meel ayee u madowdahay

Gabadhii waxa ay ka heshay wiilkii waxa ayna bilabday qaab ay ugu qaado numberkiisa iyadana ay ka dulqaado wiilka, markaas ayee waxa ay tiri " Filsanee ka waran hadaa talefankeega ka waco oo aan kaa tijaabiyo in naago badan yahay iyo in kale barina aan jawaab kaga keeno "

Filsan iyada oo aan waxba hubsan oo fuduud ayee numberkii gacanta ka sartay.

Markas ka dib maxaa dhacay ?

Halkuu ku danbeyay jaceylkii Filsan?

Damacii gabadha ma I hirgaly mise wuu fashil may?

Intaas iyo in kale kala soco qeybt 2aad.

WIXII SU'AAL IYO TALO AH IGU SOO DIR

WHATSAPP AMA IMO: 252616725007

Gmail: faysalmoha207@gmail.com